# eVaka



Ka daneysiga dhinaca korriinka curdinka ah ee elektarooniga ah

evaka ESPOO ESBO OULU TAMPERE FINLAND TURKU ÅBO VALTIOVARAINMINISTERIÖ

# eVaka - nidaamka watbixinaha ee korriinka curdinka ah

eVaka waanidaamka warbixinaha ee korriinka curdinka ah ee magaaladda oulu. Waana browser ku saleysan kuna shaqeeya qalabka mobiilka sidoo kalena ula qabsanaya kombiyuutarka si otomaatik ah shaashada cabirkeeda. eVaka waxay ku shaqeysaa luqadda finnishka iyo ingiriisiga.

eVaka cinwaankeedu waa:varhaiskasvatus.ouka.fi

Ilmaha masuulkiisa ahaan waxaad:


- sameyn kartaa korriinka curdinka ah- ama codsiyada naadiyada furan ee korriinka curdinka
- ka wargeli ilmahaaga u carbinta waxbarashada
- ka wargeli dhakhligaaga ama ka aqbal bixiinta kharashka ugu sareeya
- ka soo wargeli ilmahaaga goob joogitaankooda iyo maqnaanshahooda
- ka hubi ilmahaaga korriinka curdinka ee la xidhiidha go'aamadooda iyo macluumaadka (tusaale. qorshaha korriinka curdinka ah ee ilmaha)
- inaad ka hubin kartid shaqaaluhu sawirada ay ku daraan iyo videowyada ilmaha
- farriimaha xanaano maalmeedka
- ka akhri xanaano maalmeedka ama warbixinaha magaaladda Oulu

waxqabadyada adiga kuu muuqda oo intaa ay dheer tahay eVaka inay ku jiraan sidoo kale hantidooda, kuwaas oo kaa caawinaya ku hagitaanka iyo u qorsheynta waxqabadyada xanaanooyinka.  Su'aashu waa qorsheyn ballaadhan, taas oo dhinaceeda lagu falanqeyn doono korriinka curdinka ah sida warbixinaha macmiilka, biilka korriinka curdinka ah iyo go'aamintooda.

# eVaka da gelitaankeeda

Waxaad sameysan tahay laftaad **aqoonsiga gelitaanka iyo xarfaha siraha ah** ee eVakada, kuwaas oo aad ku daryeeleysid arrimahaa dib u cusbooneysiintooda. Sameysashada waxaa laga bilaabayaa bogagga hore jiritaankooda badhanka-gudaha u sii gal. Aqoonsiga isticmaalka sameysashadooda shuruudoodu waxay xoojineysaa ku aqoionsashada (aqoonsiga shabakada bangigga ama ku hubinta mobiiliga).

sida kalena waxaad dooran kartaa **si xoog ah u aqoonsashada** eVakada taad oo ku aqoonsashada shabakada bangigga ama ku hubinta mobilka, markaas oo maalin walba aad ka daryeeli kartid arrimahaaga oo ay dheer tahay tusaale ahaan dhakhligaaga ama codsiyadaada buuxintooda.



# Kalanderka: goob joognimadaada


Ka soo wargeli goobjoognimadaada eVaka dhinaca kalenderka. Wargelimaha aad sameysey ka soo muuqata mudooyinka dhabta ah ee xanaanooyin maalmeedka. Kalenderku wuxuu noqonayaa inuu adiga kuu muuqato laba wiig ka hor meeleynta ilmahaagu uu bilaabmay.

**Marka fiiro loo yeesho, in kalanderka uu xidhmayo axad kasta saacadda 23.59 ma ahan tan xigta, kaliya taas wiiga ku xiga dhinaceeda.** Taasina waxaa looga jeedaa tan ah, in aanad sameyn kareynin goob joognimada qabsashadeeda la soo dhaafay oo aan ahayn wiiga soo socda. Kaliya shaqaalaha ayaa ku dari kara ama qaabeyn klara maalintaa la xidhay dhinaca goob joognimadeeda.

Waxaad soo wargelin kartaa goob joognimada dhowr carruur ah isku mar goob joog/maqnaansho- badhankeeda. Dhammaan carruurtuna waa inay ahaadaan kuwo la doortey.

Waxaad u soo wargelin kartaa saacadaha saddex qaab oo kala duwan.

- **Maalin walba xilli isku mid ah**= saacadahaas oo u soo nqonoqonaya maalin walba si isku mid ah.
- **Wiiga maalin walba xilli isku mid ah**= saacaduhu ay is bedbedalayaan maalmaha wiiga dhexdooda, laakiin ay si isku mid ah u soo noqnoqonayaan wiig walba.
- **Xilliyada is bedbedalaya**= xilliyada oo aan ahayn kuwo joogto ah.



# Kalanderka: soo wargelimaha maqnaanshaha

Ka soo wargeli goob joognimadaada eVaka dhinaca kalenderka. Maqnaanshaha dhinaceeda kalenderku isma xidhayo, sidaas awgeed waxaad soo wargelin kartaa sidoo kale ilmahaaga maqnaanshihiisa sida degdega ah u dhaca eVakada dhinaceeda.

- **Maqnaanshaha hal halka ah** halka cunnug waxaad ka wargelineysaa adigoo riixa kalanderka maalintaa su'aashu tahay.
- **Maqnaanshaha mudadda dheer ah ama isla maqnaanshahaa oo dhowr carruur ah** waxaad ku soo wargelin kartaa Goobjoog/ maqnaansho-badhankeeda. Xusuuso inaad dooratid ilmaha aad maqnaanshahiisa soo wargelineysid.



# Kalanderka: kooxda/ munaasabadaha xanaano maalmeedka

Waxaad ka hubin kartaa kooxda ama xanaano maalmeedka munaasabadaha ku calaamadeysan kalanderka adigoo riixaya maalintaa la sheegayo ee furan. Waxaad ka aqoonsaneysaa calaamadaha munaasabadaha sawirka kalenderka ee yar sida maalintaa ku bar timaansan.




# Farriimaha iyo ogeysiisyada

Waxaad farriimaha xanaano maalmeedka ugu diri kartaa farriin ilmahaaga shaqaalaha kooxdiisa iyo / ama xanaano maalmeedka madaxdiisa iyo sidoo kale ku simaha madaxa. waxaad sidii kale kaga soo jawaabi kartaa kooxda ama madaxa/ ku simaha madaxa xanaano maalmeedku farriimaha ay adiga kuu soo diraan.

**Fiiro u yeelo, in farriimahaas aanan lagu falanqeyneynin warbixinaha xasaasiga ah.**

Waxaad ka heleysaa eVakada dhinaceeda oqgeysiisyo, kuwaas oo aanad ka soo jawaabi kareynin. Ogeysiimaha laguu soo dirayaa waxaa kuu soo diri kara shaqaalaha kooxda, madaxa xanaano maalmeedka, ku simaha madaxda ama magaaladda Oulu.

Farriimaha imanaya iyo ogeysiimaha waxaa laguugu soo dirayaa wargelin iimayl ah, haddii aad gelisay cinwaanka iimeylkaaga eVakada aanad diidina wargelimaha iimaylka in laguu soo diro.  Waxaad ka cusbooneysiin kartaa cinwaanka iimaylkaaga ama aad ka qaabeyn kartaa barta doorashada ee dejinta wargelimaha-Warbixinahaaga (Omat tiedot).



# Ilmuhu (waxay u baahan yahay aqoonsiga aad ku galeysid inuu adag yahay)

Bogagga ilmahawaxaad ka baadhi kartaa warbixinaha adeegyada ilmahaagu u baahan yahay, xanaano maalmeedka sawirada lagu darayo iyo videowyada ilmaha nolol maalmeedkooda iyo sidoo kale qorshaha korriinka curdinka ah ee ilmaha ama u carbinta waxbarashada qorshaha u deggan waxbarashada.


Waxaad sidoo kale ka fasixi kartaa ilmaha u carbinta waxbarashadiisa-, korriinka curdinka ah ama korriinka curdinka ah ee furan iyo boosaska naadiyada.



# Doorashada (codsiyada, go’aamadda, warbixinaha dhakhliga, warbixinahaagu- waxay u baahan yihiin aqoonsi lagu galo oo adag)

Doorashada waxaa ka dambeeya codsiyada, go’aamadda warbixinaha dakhliga iyo warbixinahaaga.

- **Codsiyada:** Waxaad sidoo kale ku soo wargelin kartaa u carbinta waxbarashada ilmahaaga, uga dalab booska korriinka curdinka ah ama naadiyada korriinka curdinka ah ee furan/ naadiyada. Waxaad sidoo kale ilmahaaga uga sameyn kartaa codsiga wareejinta waax kale oo krriinka curdinka ah adigoo buuxinaya codsi cusub. Khariidada waxaad ka arkeysaa waaxda korriinka curdinka ee goobeynta.
- **Go’aamada:** Waxaad ka arkeysaa goobta-, biilka- iyo go’aamadda kaalmooyinka. Waxaad ka aqbali kartaa ama ka diidi kartaa ilmahaagu booskaa uu heley.
- **Warbixinta dakhliga:** Waxaad ugu diri kartaa dakhligaaga ama kan ilmahaaga ama aad ka aqbali kartaa kharashka ugu sareeya ee kharashka macmiilka. Cid kasta oo isla deggan oo isku dhaqaalaha ah oo dad waaweyn ah waxaa loo soo gudbin karaa dhammaan dakhliyadooda.
- **Warbixintaada:** Waxaad ka hubin kartaa cinwaankaaga aadna ka cusbooneysiin kartaa telefoon lambarkaaga iyo sidoo kale cinwaanka iimaylkaaga. Waxaad sidoo kale soo cusbooneysiin kartaa iimaylkaaga dejinta wargelimaha.



# Caawimaadda xaaladaha dhibaatada

**Aaladda korriinka curdinka ah ayaa kaa caawinaya eVaka dhibaatooyinka la xidhiidha.**

**Waxaad ku diri kartaa aaladaha codsiga adeegyada cinwaankooda:**

[Codsiga adeegyada.siku. ouka.fi/customerui]

evaka ESPOO ESBO OULU TAMPERE. FINLAND TURKU ÅBO